# MACLUUMAAD-SIDAHA FALANQAYNTA MACLUUMAADKA DILKA GURYAHA EE LOOGU
TALA GALAY XUBNAHA QOYSKA

Home Office

## WAA MAXAY FALANQAYNTA DILKA GURYAHA?

Falanqaynta Dilka Guryaha waa hab loogu hormarinayo ka jawaabidda dibindaabyada guryaha waxaana loola jeedaa in la hakiyo waxa ku dhacay xubnaha qoyskaaga inay ku dhacaan dadka kale. Waxay hubinyaan xubnaha bulshada sida hawl-gallada bulsahda, degmada, boliiska iyo hay'adaha ku salaysan jaaliyada inay fahmaan waxa dhacay iyo wixii keenay dilka xubnaha qosykaaga iyo in la helo halka laga hormarin karo ka jawaabista arrintaan oo kale. Arrintaan, xubnaha bulshada waxay rajaynayaan inay wax ka bartaan duruusta saxa ah ay ka mid yihiin arrimaha keeni kara inay wada shaqeeyaan. Falanqayntaan waxay raadinmayso eedaysane laakiin waxay raadinaysaa wixii dhacay iyo waxa ka duwan ee la qaban karay. Waxay kaloo ku talin doonaan ficillada lagu horumarin karo ka jawaabidda xaaladaha dibindaabyada guryaha waayaha dambe.

Falanqaynta Dilka Guryaha waxay ka mid tahay Xeerka Dibindaabyada Guryaha, Dembiyada iyo Dibanayaasha 2004 (Domestic Violence, Crime and Victims Act 2004) wuxuuna xeer noqday laga bilaabo 13 Abriil 2011. Ma beddelayso laakiin waxay u tahay xoojin baarintaanka ama nooc waliba oo baarintaan.

## YAA SAMAYN DOONA FALANQAYNTA?

Kooxda falanqaynta waxaa laga samayn doonaa xubnaha degaanka ee joogtada ah iyo xubno mutadawac ah laakiin kama mid noqon doonaan saraakiisha sida tooska ugu jira kiiska. Kooxda falanqaynta waxay eegi doonaan sida loo horumarin karo ka jawaabidda jaaliyada dibindaabyada guryaha si fiican loo taakuleeyo dibanayaasha.

## KA QAYB GALKAAGA FALANQAYNTA

Waxay nala tahay saaxibada, xubnaha qoyska iyo dadka kale yaqaan dhibanaha iyo dib-wadayaasha dadka ku haboon inay caawinaan saraakisha inay fadhmaan waxa dhacay. Dhibanayaasha waxay mar waliba u sheegaan qoyskooda xad-gudubka ay la kulmaan iyo, mararka qaarkood, waaya-aragnimadooda inay waydiistaan caawinaad. Taas waxaa raacda in xubnaha qoyska inay caawini karaan xubnaha bulshada inay ogaadaan duruursta laga baran karo dhacdaan xun, sidaas daraadeed codkaaga waa in la maqlaa.

## KA QAYB GALKA FALANQAYNTA

Haddii aad ku tashato inaad ka qayb gasho falanqaynta, kooxda falanqaynta waxay ku waydiin doonaan inaan la qaybsato fahamkaaga wixii dhacay. Tani waxaa ka mid noqon karta fekerkaaga, xusuustaada iyo aragti waliba ee ku saabsan shiddada. Kooxda falanqaynta waxay hubinayaan in sida ugu fiican loo fahmo xaaladihii dhimashada xubinta qoyskaaga iyo in wax laga bartay in loo isticmaalo sidii loo hakin lahaa dhimasha kale waqtiyada soo socda. Tani waxa ka mid ah, inaad ka war haysid isku dayga xubnaha qoyskaaga inay raadshaan caawinaada xubnaha bulshada, ururrudada jaaliyadda iyo kuwa kale mararka qaarkood kooxda falanqaynta inaysan xiriirradaan. Waxaa suurtowda inaad ku talisid dad kale si loogu martiqaado inay soo gudbiyaan aragtdi.

Waxaad ku gudbin kartaa ra'yigaaga iyo aragtidaada kulligood ama qaar ka mid kuwaan soo socda:

- Qoraal ahaan ama duubista
- Ka qayb gal teleefoon ahaan
- La-kulanka qaar ka mid ah xubnaha weji-ka-weji. Kulankaan kama dhacayo maxkamad dhaxdeeda isla markaasna laguma waydiinayo inaad la qaybsato araa'aada adigoo lagu dhaarinayo. Falanqayayaasha waxay waydiin doonaan su'aalo si ay caawinto doodda iyo socodka hawsha oo idil mana socon doono in ka badan inta aad ka qayb geli kartid.

## MAXAA DACAYA MACLUUMAADKA AAD LA QAYB SANAYSID?

Macluumaadka aad la qaybsanaysid kooxda falanqeeyayasha wuxuu ka caawinayaa inay dhisaan sawir buuxa wuxuu dhacay inta ka horraysa dhacdada dilka iyo waxayna kooxda siinaysa inay nidaamiyaan talooyinkaa isbdeedl. Ka dib talooyinkaan waa la hawl-gelinayaa. Wax-ku-darkaagana xog ahaan waa la xejinayaa waxaana la magabi doonaa waxbixinta falanqaynta.

Tabarrucaaga wuxuu noqon doonaa wax qiima badan wuxuu wax ka beddeli karaa sida ay jaaliyadda, ay ka mid yihiin xubnaha bulshada, ay uga jawaabaan dhibanayaasha dibindaabyada.

## IMISAY QAADANAYSAA HAWSHA FALANQAYNTA?

Ma jiro waqti cayiman falanqaynta dilka guryaha laakiinse waxaa lagu tala gelayaa inuu bilowda bil ka dib dhacda dhimashada. Falanqaynta waa inuu dhammaadaa lix bilood gudahood waxaase suurtowda inuu qaato muddo ka badan iyadoo ay ku xiran tahay waxa ka soo baxa baaritaanka, matal ahaan, haddii ay jiraan baaritaan dembi qofka dhib-wadaha ah.

## FALANQAYNTA MAXAY DHALINAYSAA?

- Wax bixin tifaftiran iyo mid kooban ayaa loogu soo bandhigi doonaan shabakad ummadeed
- Ficil tillaabo lagu hubiyo in horay loo qaaday tillaao sax ku ah warbixinta

## TILLAABADA XIGTA

Talada inaad ka qayb gasho falanqaynta adiga ayaa iska leh haddii aadan doonayn inaad ka qayb gasho go'aankaaga waan tixgelinaynaa. Dib ayaannu kuula soo xiriiraynaa si aan kugu war gelinno in falanqayanta la dhammaystiray.

Haddii aad doonayso inaad ka qayb gasho ama aad qabtid wax su'aal kale ee ku saabsan hannaanka falanqaynta fadlan qofka saxiixay warqadda ku lifaaqaan macluumaad-sidahaan la xiriir. Waxay kaaga soo jawaabi doonaan su'aalahaaga ama waxay ku gudbin doonaan qof kale.

## MACLUUMAAD DHEERI AH IYO CAAWINAAD

National Domestic Violence Helpline (Taageerada Dibindaabyada Guryaha ee Qaranka): 0808 2000 247 ama www.nationaldomesticviolencehelpline.org.uk

Men's Advice Line (Xarigga Talada Ragga): 0808 801 0327 ama www.mensadviceline.org.uk

GALOP: 0800 999 5428 ama galop.org.uk

AAFDA (Advocacy After Fatal Domestic Abuse (Difaacidda Dhacdada Xun ee Dibindaabyada Guriga ka Dib): 07768 386922 ama www.aafda.org.uk

National Homicide Service (Hawl-galka Dilka Qaranka): 0845 3030 900 ama www.victimsupport.org.uk

**Mahad waxaa iska leh AAFDA (Advocacy After Fatal Domestic Abuse) oo la sameeyay macluumaad-sidahaan Home Office.**